Qodobka 48 (Dalacaadda mutaysiga gaar ahaaneed)

Xubnaha Ciidanka ka tirsan ee u qabata hawl muhiim ah Ciidanka Boliiska ama ummada waxaa lagu dalacsiin karaa mutaysi gaar ahaaneed.

2. Xubintu waxay dalacaad mutaysi gaar ahaaneed ka hormareysaa Liiska dalacaada ku timid mudnaanta iyo abaalmarinta ee ay isku dereiada vihiin.

Qodobka 49(Liiska Mudnaanta)

Si loo tixgeliyo dalacaada Ciidanka, liistooyinka Ciidanka waa in laga helo Taliska Ciidanka Boliiska iyo Duqa Magaalada iyagoo derejo-derejo ah.

Qodobka 50 (Guddiga qiimaynta)

i loo sameeyo dalacaada mudnaanta ama mutaysiga, Taliyaha Ciidanku ama Duqa Magaalada wuxuu magacaabayaa Guddi ra'yigooda ka soo jeediya Dalacaada Xubnaha Ciidanka.

2. Si uu u ansaxo go'aanka guddigu waa in la helo saddex meelood-laba meelood (2/3) xubnaha Guddiga ee cod bixinta leh.

3. Xubnaha Guddigu waxay rayigooda ku dhiibanayaan cod furan. Cod-bixintu waxay ka soo bilaabanaysaa kan u derejo hooseeya ee Guddiga, codka guddoomiyaha Guddiga ayaa u dambaynaya.

4. Guddiga Qiimayntu wuxuu ka koobanaanayaa Sarkaal sare iyo Sarkaal ka derejo sareeya Xubinta la qiimaynayo. Taliyaha Ciidanka ama Duqa Magaalada ayaa xulanaya Guddiga Qiimaynta.

Qodobka 51(Qiimaynta Dalacaada)

Si loo qiimeeyo dalacaada mudnaanta, Xubintu waa inay derejadaas haysato laba sannadood, haddii loo baahdana uu maro Tababar uu u helo natiijo wax ku ool ah. Dalacaada lagu helo mutaysiga muddada kor ku qoran waxaa loo celin karaa hal sanno.

2. Xubinta Ciidanka ka tirsan ee lagu oogo Gef asluubeed, dacwad maxkamadeed ama ay u yaaliin (Pending) amase shaqada laga laalay, loo qiimayn maayo dalacaadda intay jiraan arrimahaas kor ku xusan.

3. Guddiga Qiimayntu waxay ra'yigooda sal uga dhigayaan warbixinta Galka gaar ahaaneed ee Xubinta la Qiimaynayo iyo Natiijada Imtixaanada.

4. Guddiga Qiimayntu waa inay ra'yigooda ka dhiibtaan Xubinta la qiimaynaayo inay u qalanto dalacaada iyo in kale. Xubinta Ciidanka ka tirsan ee hela kala badh Codka Guddiga Qiimaynta waxaa loo aqoonsanayaa inuu dalacaada istaahilo. "Qualified"

5. Marka laga hadlaayo mutaysiga dalacaada, Xubinta Ciidanka Boliiska waxaa loo aqoonsanayaa inuu istaahilo markuu helo saddexmeelood - laba meel codka guddiga qiimaynta. Taliyaha Ciidanka ama Duqa magaalada waxay u dooran karaan xubnaha istaahila dalacaada inay maraan Tababar lagu qiimaynaayo.

6. Guddiga Qiimayntu waxay Xubnaha ku kala saarayaan dhibcaha ay ku kala helaan Imtixaanka. Xubno haddii ay isku dhibco noqdaan waxaa lagu kala saarayaa Mudnaantooda derejo.

7. Dhibcaha mutaysiga ee ku xusan Xubinta lixaad waxaa loo eegayaa:-

   B. Akhlaaqda, dabeecadda iyo fayoobida;
   T. Aqoonta Xirfadeed uu ka kasbaday shaqada, iyadoo la tixgelinaayo kartidiisa iyo amar bixintiisa;
   J. Garashadiisa iyo aqoontiisa tacliineed;

8. Xubnaha ka qudba Qimaynta ee istaahila ama mutaysta dalacaada waxaa ansixinaaya Taliyaha Ciidanka Boliiska ama Madaxa kale ee awooda u leh. Xubinta istaahili waaya ee ka hadha Dalacaada, mar kale ayaa qiimayn loo samayn karaa.

9. Caddaynta in Xubintu istaahisho ama mutaysataba dalacaad, keenimayso inuu xaq u yeesho dalacaad durbadiiba.

10. Xubinta Ciidanka ee ku sifowda sida ku cad xubinta labaad ee Qodobkan waa laga laalayaa dalacaada. Taliyaha Ciidanka Boliiska ama Duqa Magaalada ayaa awood u leh inay ka laalaan dalacaada xubintaas Ciidanka ah ee lagu helay inuu galay falal culus oo dhan ka ah Sharciga amaba lagu soo oogay gef asluubeed ama mid ciqaabeed. Xubinta waa in la ogeysiiyaa sababta keentay laalista dalacaadiisa.

11. Xubinta Ciidanka ee ka gudbi weyda qiimaynta ama ku weyda dalacaada asbaabaha ku xusan Xubinta labaad iyo tobnaad ee Qodobkan, waxaa dib loogu samayn karaa Qiimayn ama dalacaad markay joogsadeen sababihii keenay horjoogsiga. Qimaynta mudnaanta dalacaada ee xubintu waxay la jaanqaadaysaa xubnihii markii hore lala qiimeeyey.

## Qaybta 7aad
## Fasaxa Mushaharka iyo Xaaladaha Xubnaha.

### Qodobka 52 (Mushahaarooyinka)

Haddii aan Xeer - nidaamiyahani si kale u sheegin xubin kasta oo shaqada joogtada ah haysa, wuxuu xaq u leeyahay Mushahar dhan. Markuu ku jiro fasax caadi ah, mid bukaan socod iyo bukaan jiifba.

2. Mushaharooyinka iyo gunnoooyinku wey ka go'ayaan Xubnaha:-

B. ka joogsada shaqada caadiga ah sabab kasta ha ahaatee;
T. Fasaxiisa dhaafiya muddo 48 saac ka badan;
J. La siiyo fasax gaar ahaaneed;
X. la cadeeyo inuu baxsad yahay ama laga laalay shaqada;

Qodobka 53 (Mushahar-dhimis iyo ka-jaris)

Dhimmidda iyo ka jarista mushahaarooyinka xubnaha Ciidanka Boliisku waxay u imanaysaa sidan so socota:-

B. ganaax loo saaray Xubinta gef-asluubeed awgeed;
T. Amar Maxkamadeed;
'. Shaqo laalis;
X. Deyn, dayacaad ama khasaaro loo gaysatay hanti dawladeed;
Kh. fasax aan caadi ahayn oo ay keentay asbaabo waxbarasho, Bukaan-socod ama Bukaan-jiif ee u Xerkani tilmaamayo.

2. Marka laga reebo Xaaladaha laalista shaqada ee leh dabeecad joogtada ah, oo ay mushahaarada iyo gunnooyinku noqonayaan kala badh, isku darka jarista iyo dhimiddu waa inaanay ka badan xad uu tilmaamayo Qodobka 73aad Xubinta 3aad ee Xerkan.

Qodobka 54 (Raadka uu ku reebaayo Fasax-ku maqnaanshaha hawlgabka iyo xaqa)

Marka laga hadlaayo hawlgabka iyo xaqa, waqtiga ku maqnaanshaha Fasaxa bukaan ee ka yimaada shaqada waxaa loogu xisaabinayaa muddada shaqada, haseyeeshee Xubinta la siiyo Fasax aan caadi ahayn oo mushahar la'aan ah ku maqnaanshaha fasaxa gaar ahaaneed iyo Laalista shaqada loogu xisaabin maayo muddada shaqada.

Qodobka 55 (Dhimasho, Naafo, Dhaawac iyo Bukaan)

Taliyaha Ciidanka Boliiska ama Duqa magaalada ayaa go'aaminayaa iyagoo dhageysatay Guddi Caafimaad in dhimashada, Naafada iyo bukaanku ka yimaadeen sabab la xidhiidha shaqada.

Qodobka 56 (Fasax caadi ah )

Iyadoo loo danaynaayo shaqada, xubin kasta oo Ciidanku waxay sannadkii xaq u leedahay Fasax Soddon maalmood ah oo Mushahaaro leh.

2. Taliyaha Ciidanka Boliiska, Duqa magaalada ama sarkaalka taliyaha u ah xubinta fasaxa ku sugan way u yeedhi karaan iyadoo laga joojiyo fasaxii, danta shaqada awgeed, haseyeeshee waa loo kaydindoonaa.

Qodobka 57 (Damaanad-bixinta xubnaha ku sugan waxbarasho dibadeed)

Xubin kasta oo ka tirsan Ciidanka oo waxbarasho u dirto dawladdu, hay'adaha gudaha, Hay'adaha caalamiga ah ama dawlad kale waa inuu saxeexo damaanad ah inuusan shaqada ka tagayn muddo cayiman sida hadba uu dhigaayo Xeerka waxbarashada dibaduhu.

2. Haddii xubintu jebiso shuruudaha damaanadda lagu muujiyey waxaa ku waajib ah inuu bixiyo kharashkii ku baxay waxbarashadiisa, iyadoo la raacayo Xeerka Madaniga ah.

3. Xubinta Ciidanka ee waxbarasho dibadda ugu baxda sida uu sheegaayo qodobkan xubintiisa kowaad, ma yeelanaayo Mushahaarooyin iyo Gunnooyin aan ka ahayn kharash ah Gunnada (Subsistance allowances), waxase shardi ah in waxbarashadu anay ahayn mid ah Xirfadda Boliiska.

Qodobka 58 (Ururidda Fasaxa)

Iyadoo la eegaayo danta shaqada, xubnaha waxaa waajib ku ah inay sannad fasaxeedkooda qaataan.

2. Iyadoon waxba loo dhimeyn kasbidda fasaxa ee uu Xeerku tilmaamaayo, waxaa reeban ururid fasax oo ka badan laba bilood.

Qodobka 59 (Dhaafidda Muddada Fasaxa)

Xubin kasta oo sabab la'aan fasaxiisa u muddo dhaafay, waxaa loo qaadanayaa inuu ku maqnaa fasax aan caadi ahayn. Mushahaaro iyo gunno yeelan maayo mudadaas, iyadoon laga tegayn wixii gef-asluubeed ah ama ciqaabeed ee ka dhalan kara.

Qodobka 60 (Awood- bixinta fasaxa)

Madaxweynaha Jamhuuriyaddu, wuxuu awood u leeyahay inuu Taliyaha Ciidanka siiyo fasax kasta oo Xeerkani dhigaayo isagoo dhegaystay Wasiirka Arrimaha Gudaha.

2. Bixinta Fasaxa Ciidanka Boliiska ee heer qaran, waxaa awood u leh Taliyaha Ciidanka Boliiska, Saraakiisha Sare fasaxooda waa in Taliyaha Ciidanku u sheego Wasiirka Arrimaha Gudaha.

3. Bixinta fasaxa Ciidanka ee heer deegaan waxa awood u leh Duqa Magaalada, marka laga reebo Saraakiisha.

Qodobka 61 (Waajibaadka saaran xubnaha fasaxa)

Xubnaha Ciidanka ee fasaxa ah waxaa saaran waajibaadka asluubeed ee Ciidan iyo arrimaha kale ee ay ku kasbadeen maqaamkooda sharci(Juridical Status)

**Qodobka 62 (Diiwaan gelinta fasaxa)**

Fasax kasta oo la bixiyo, waa in lagu diiwaan geliyo galka shaqsiga ee xubinta.

**Qodobka 63 (caddaynta shaqo ka-bixidda)**

Xubin kastaa markay shaqada ka tegayso waa in la siiyo caddayn muujinaysa muddaduu shaqada hayey iyo sababihii shaqo ka tegista.

2. Xubinta ka tegaysa shaqada waa inay dib u soo celiso wixii hub ah, rasaas iyo Qalab kale ee uu hayey dawladduna leedahay.

**Qaybta 8aad.**
**Asluubta.**

**Qodobka 64 (Xeerkan iyo Xeerar kale)**

Iyadoo aan waxba loo dhimayn, ciqaabaha Culus ee ku xusan Xeerka Ciidamada , Xeerka Ciqaabta iyo xeerarka kale, gefafka asluubeed ee ku xusan xeer nidaamiyahan waxaa loo fulinayaa sida xeer nidaamiyahani qabo.

**Qodobka 65 (Habka loo qaado gef asluubeedka)**

Marka la qaadayo dacwad ah gef asluubeed, waa in la ilaaliyo cadaaladda iyo xaqsoorka, xubinta qaadaysa gef asluubeedka waa inay tixgeliso xagaa'iqa jira ee ku gedaaman falka. Xubinta dacwada loo haysto waa in la siiyo fursad lagu dhageysto oo uu isku daafaco.

2. Xubinta marka Ciqaabta la saarayo waa in la tixgeliyo dhaqankiisii hore, aqoonta uu shaqada u leeyahay iyo natiijada ka timid gefka.

3. Xubin Sare ma saari karto xubin ka hoosaysa ciqaab ka duwan tan Xeernidaamiyuhu qabo, mana saari karto ciqaab awoodeeda Sarkaal ka sareeyaa iska leeyahay.

4. **Qodobka 66 (Waajibka ku qaadista gef Asluubeed)**

Xubin kasta oo ka tirsan Ciidanka oo uu hortiisa ku galay ama ku galayso gef asluubeed xubin ka derejo hoosaysaa, waa inuu talaabada ku haboon ka qaado haddii uu awoodeeda leeyahay.

Waxa kaloo waajib ku ah inuu gefka joojiyo una qudbiyo Sarkaal ka sareeya, waxaa kaloo intaas u raaca haddii u gefuhu ka tirsanyahay fadhi kale inuu dhacdada u gudbiyo Taliyihiisa. Haddii ay arrimahaas kor ku xusani suuragal noqon waayaan wuxuu gefuhu u gudbinayaa xubinta isaga ka sareeysa ee ugu dhow.